Ka socota kormeeraha guud: Tubman/Roseway 2018, kala wareega dugsiga dhexe

Shaqaalaha iyo qoysaska PPS ee qaaliga ah,

Sida laga yaabo in aad ogtihiin, degmadu waxay ka shaqaynaysay in ay bilowdo hab cusub oo dugsiga dhexe leeyahay si looga hirgeliyo guud ahaan degmada dhowrka sano ee soo socda. Qayb ka mid ah ujeedadu waa in wax laga qabto sinnaan la'aanta ka jirta fasallada dhexe ee keentay cawaaqib xumo aan lagu talagalin ee habka K-8. Waxaa jira tallaabo muddada dheer loogu talagalay si dugsiyadeena dhexe loo hoos keeno hab cusub oo wanaagsan iyada oo la adeegsanayo hab wejiyo kala duwan leh.

Wejigan u horeeya waxaan ka shaqayneynaa in aan labo dugsi oo dhexe aan keeno internetka kaasi oo loogu talagalay waqtiga sanad dugsiyeedka 2018-19-ka kuwaasi oo ah Harriet Tubman iyo Roseway Heights. Waxaan rabaa in aan idinla qaybsado horumarka aanu samaynay si aad u haysato macluumaadkii u dambeeyay iyo macluumaadka saxda ah anaga oo hore u socona

Juun 1, waxaan Guddiga Tala bixinta Dib u eegida Xuduuda Degmada siinay dokumentiyo hordhac ah oo wada socda oo la xiriira dugsiyadii hore loo soo jeediyay in ay aadaan 'feed' labada dugsi dhexe. Si wax loo kala caddeeyo, tani waa fikrad soo jeedin, ee maaha qorshe. Ujeedadaydu waxay ahayd in aan aragti wax soo saar siiyo guddiga si ay talo uga dhiibtaan isla markaana loo xaqiijiso in nidaamku ahaado mid sii socdo ka dib marka wakhtigayga aan ahay Kormeeraha Guud ee Ku meel gaarka ahi uu dhamaado bishan Luulyo.

Bilowgii waxaan rajayneyay in aan qorshaha u soo bandhigo Guddiga PPS si ay go'aan uga gaaraan dugsiyada laga tegayo 'feeder schools' iyaga oo go'aanka ku gaarayaan muddo aan ka dambayn Juun 20 sababtoo ah hadba sida dhakhsaha leh ee aan u aqoonsano dugsiyada laga tegayo 'feeder schools' waxay hore u suurta gelinaysaa in aanu la shaqayn karno waaxyaha iyo wakiilada kala duwan si dugsiyada dhexe wanaagsan loo keeno internetka. Waxaan go'aansaday in shaqo dheeraad oo lala yeesho buldhada dugsiga ay lagama maarmaan tahay ka hor inta aan loo soo bandhigin Guddiga in ay tallaabo qaadaan.

Si wax loo kala caddeeyo, go'aankani macnihiisu maaha in aanu dib u dhigayno hadafkeenii ahaa furida dugsiyada dhexe ee dayrta 2018-ka. Waxaanu kaliya u baahanahay waqti dheeraad ah oo aan ku horumarino shaqada aasaasiga ah ee dugsiyada laga tegayo 'feeder schools' isla markaana loo xaqiijiyo in bulshadu haysato wakhti ku filan oo ay kaga qayb qaataan nidaamkan.

Si taasi loo gaaro, waxaan isku keenaya koox maamulayaal ah iyo agaasimayaal sare si ay u hoggaamiyaan qaybtan mashruuca isla markaana u dejiyaan fikrad soo jeedin tixgelin siisa: sinnaanta xagga isirka, qiyaasta dugsiyada K-5, barnaamijyada habka waxbarid ee luqada, saameyn ballaaran ee ay ku yeelan karto dugsiyada kale iyo walwalka kale ee laga dhawaajay maalmihii la soo dhaafay. Hadafkeygu waa in shaqadan la dhamaystiro horraanta wakhtiga dayrta, iyo fikrad cusub oo la soo jeediyo oo ka turjumaysa talooyinka bulshada, oo ay ka mid yahay DBRAC, in loo soo bandhigo Guddiga ka hor dhamaadka Oktoobar.

Shaqo badan ayaa ilaa iyo hada la qabtay, oo ay ka mid tahay dejinta qaab faahfaahsan oo la xiriira fasallada dhexe oo noqon doona tilmaanteena iyada oo dugsiyadan dhexe ee cusub u qorshaynayno in ay guul gaaraan. Waxaad tilmaanta la raacayo, iyo waxyaabaha kale ka akhriyi kartaa www.pps.net/middleschools.

Website-kani waxa ku jiri doona macluumaad ku saabsan fursadaha ka qayb qaadasho iyada oo xiriir dheeraad ah oo ay horseed ka noqon doonaan xafiiska dhexe iyo dugsiyada degaanku si loo xaqiijiyo in bulshada oo dhan lagu wargeliyay horumarka iyo qorshaynta.

Mar kale, hadafkeenu furida dugsiyadan dhexe waa in la bixiyo helitaan dheeraad ah oo barnaamijyo fasalka dhexe ah oo wanaagsan oo laga helayo meel aan taariikh ahaan aan si fiican adeeg u helin. Waxaan rabaa in aan u mahadceliyo dhammaan dadka idinka midka ah ee ka shaqeeyay tani iyo kuwa igala soo xiriiray nidaamka. Waxaan rajeynayaa in aad sii wadi doontaan ka qayb qaadashada iyo gacan ka geysashada shaqadan muhiimka ah inta lagu jiro xagaaga iyo horraanta dayrta.

Bob McKean
Kormeeraha Guud ee Ku meel gaarka ah